# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 10:31 AM** **Hansard No.18/2** **15/07/2012**

## Dooda Xeerka Baananka Islaamiga ah akhriskii 2aad, waxaa ka qayb qaatey 10 mudane.

***Fadhigii 14aad ee Kal-fadhiga 18aad***

***Gudoomiyaha Md. C/raxamn Maxamed C/lahi (Cirro)*:-** Mudanayaal waxaa shaley Golaha loo qeybiyay Xeerka Baananka Islaamiga ah, mantana waxaynu bilaabeynaa dooda xeerka sidaa darted waxaan mudanayaasha u sheegayaa inay is qoraan mudanyaasha dooda xeerka ka qaybqaadanayaa Xoghayntuna soo qorto.

**Doodiii Xeerka baananka Islaamiga ah**

1. **Md. C/raxman Cisman Caalin:-** marka soo jeedin Golaha laga soo jeediyo oo ay Secondment hesho waa in sideeda loo qaataa oo la joojiyaa wixii kale sida Xeer Hoosaadku dhigayo inkastoo secondment iska badan yihiin hadana, tan kale waxaan odhan lahaa hadaad u gudbo xeerkan, waxaynu ka doodnay sanadkii 2011 baan u maleynayaa taariikhda saxda ah ma hayo, dood dhameystiran ayaa laga dhiibtey waxay ahayd in doodii dhacdey in la keeno oo Golaha loo qeybiyo oo aanu ogaano oo hadii doodiisa dib loo bilaabayo in soo jeedimihii hore aanu helno ayaanu xaq u lahayn, waxaan anigu odhan lahaa waa dhaliil Xoghaynta iyo Administrationku uu leeyahay.

   ***Waxaan Soo Jeedinayaa:-*** Xeerkaa maadaama aynu hore uga doodney inaan dib loogu noqon xaq wuxuu Goluhu u leeyahay in sidiisa lagu ansixiyo oo lagu qaato, waad mahadsantihiin.

2. **Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nacnac):-** Shirgudoonka iyo Mudanaayshu wey salaaman yihiin, ***Waxaan soo jeedinayaa oo aan taageersanahay sidaa C/raxman dheere yidhi,*** Xeerkaa waan ka doodneye waa in sidiisaa lagu ansixiyo, waad mahadsantihiin.

3. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** ***Waxaan soo jeedinayaa:-*** Xeerkan horeynu uga doodney waxaa iminka ina horyaal waa wax ka badal waxay ila tahay in Xeerkan iminka aynu u codeyno oo kaliya Waad mahadsantihiin.

4. **Md. Cali Maxamed Aadan (Cali Barre):-** shirgudoonka iyo Xildhibaano marka hore salaama caleykum, marka xiga Xeerkan Baananka Islaamiga ah ee iminka ina horyaala waxyaabo badan baa ka dhiman, oo doodiisii hore ee aynu ka doodney may jirin wixii saldhiga u noqon lahaa oo ahaa Xeerka Baanka Dhexe, oo Xeerkii Baanka dhexe xilgaa ma ansaxsanayn, ka dib beynu ansixinay, waxaa loo baahan yahay markaa in Xeerka Baanka dhexe iyo Xeerkan baanaka islaamiga ee Gudidu iminka keentay in la iswaafajiyo, aad baan isha u mariyay xaley oo Xeerkii

baanka dhexe ee aynu ansixinay ma waafaqsana qaabka uu u qoran yahay qaab xeer maaha, tan kale la taliye sharci xaga dhaqaalaha ah buu u baahan yahay expert, had iyo jeer waxaad moodaa in xeerarka cid dabada ka eryayso, meesha lagu cararayo anigu garan mayo.

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** Xeerkan ha la hakiyo oo expert aqoon u leh ha loo keeno oo Xeerkii Baanka dhexe hala waafajiyo, xeerkan dhaqaale ayaa ku jira oo umad baa hantideedu galaysa qaybta hantida depositka ah ma dhameystirna oo cidii lacagta dhiganeysa shuruudo badan baa ka maqan, Markaa Xeerkan Ha la kiyo ayaan ugu danbeyn soo jeedinayaa.

5. **Md. Cumar Axmed Saleeban (Sanwyene):-** Gudoomiyaa sidaa Xilldhibaan Cali u sheegay Xeerka baanku maaha wax sahlan, mana aha wax local ah ee waa international oo dunida daafaheeda oo dhan buu la shaqeynayaa, markaa laba xaalba waan ku arkey sharcigan, horta waa mide sharciga hadii laga doodo oo aan wali inaga bixin dee waynu farsameyn karnaa wixii aynu u aragno inuu sharciga hagaajinayo, baanka marka la furayo waa inuu lahaadaa hanta maguuraan ah, oo waa inuu dadku helaa security oo hadii aan lacag ka amaahanayo dee rahan keen buu odhanayaa ama damaanad buu u baahanyahay, halkan waxaa ku qoran 5000 oo dollar buu depositgareynayaa, hadii uu baanku furanyahay lacagta uu depositgareyno, lacagta depositka ah waa inuu baanka dhexe hayaa inuu furan yahay waa in centeral banku hayaa lacagtaa, ma jiro oo meesha kumaan arag wax grantee gareynaya lacagtaa aan baankaa dhiganayo.

Tan labaad hadii baanku yahay mid international ah oo dad ajaaniba ahi leeyahay ama Holland inaga yimi ama yaman inaga yimi, waa inuu grantee yahay, oo dawladiiusu grantee gareysaa, oo waliba lagu qoraa hadii la isqabsado in case sharcigeena iyo sharciga dalkaa ayaa lagu kala baxayaa, maaha sharcigeena oo kaliay waayo haduu yemen inaga yimi ee bank oo marka la isqabsado yemen tidhaahdo war Somaliland ma aqaane iga tag umadu way waayeysaa wexeedii, marka uu bank ajaaniba uu ka furanayo halkan waa saddex meeloodow meel waa inuu deposit uu baanka dhexe ka hayaa, tan kale marka la isqabsado, hadii ay dadkii lacagta dhigtey ay isqabasadaan ama dawlada iyo banku isqabasadaan oo bankiiba yidhaahdo anigu bankrupt baan ahay oo lacagba mahaysto ileyn baanankii aduunka ugu waaweynaaba baaba kacaye, markaa waxa weeye marka bank systemku yahay nabad yahay dhaqaalihii wadanku wuu nabadgalayaa,

***Markaa Gudoomiye waxaan soo jeedinayaa***:- Waa in baanku one third assetkisa ama wuxuu leeyahay laga hayaa, tan kale hadii la isqabsado cida garnaqaysaa waa inay noqotaa maxkamadaha Somaliland, hadii wadan kale ka yimi waa inay labada dalba ka garnaqaan waa sidaa sharciga lagu qoraa.

6. **Md. Ibraahim Jaamac Cali (Rayte):-** shirgudoonka iyo Mudanyaasha waad salaamantihiin runtii Xeerkan Baananka Islaamiga ahi waa Xeer aad iyo aad muhiim uh, horta waxaan secondtment siinayaa oo aan taageesanahay qodobada ay soo jeediyeen Calibarre iyo Cumar Sanweyne, waxaan qabaa Xeerkan oo kale waa xeer u baahan farsamo yaqaano iyo aqoonyahano ku xeel dheer aaga islaamig baanka, xeerarka qaarna Gudiyadeenu way ku filan yihiin oo wey soo sameyn karaan, qaarna ma sameyn karaa, sideedaba Xildhibaanadu xeerarka ma sameeyaane dadbaa farsama yaqaanaa sameeya oo xildhibaanku siyaasada xeerka xambaarsanyah bay

eegaan, laakiin technical iyo draftgareyntisa sameyntiisa maaha mid loogu talagaley Mudanayaasha.
Anigu waxaan jeclaa xeerarka noocan oo kale ee baananka ama kuwa cominicatedka ah waxaa loo baahan yahay dadka khibrad u leh inay inoo soo draftgareeyaan oo aan kala tashano, tan kale Xeerkani Baananka Islaamiga wuxuu ka mid yahay Commerce bankska markaa waxaan qabaa in Xeerkii baanka dhexe iyo Xeerka Ganacsiga Baananka waa in lala akhriyaa, oo sidey u kala horeyaan loo kala horeyso/

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** Xeerkan ilaa intaa aan isla helno in la hakiyo doodiisa.

**7.Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** Mudanayaasha iyo shirgudoonka way salaamanyihiin, runtii Xeerkan sidii xildhibaanadii iga horeeyay soo jeediyeen waa muhiima oo qayb ka qaadanaya koboca dhaqaale ee dalka, Xeerkani aniga wuxuu iila muuqdaa inay ka muuqato in si farshaxanimo leh oo qurux bada loo soo dejiyay wax dhaliila oo dib loogu celiyo ama dib looga doodo iilama eeka.

***Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa:-*** Xeerkan maadama hore looga soo doodey, wax lagu diidaana aanay jirin ama gef wax ka badal loogu sameeyana aanu jirin, waxaan mudanayaasha ka codsanayaa in si ugu dhakhsaha badan loo ansixiyo.

**8. Md. Xuseen Maxamed Cige:-** shirgudoonka iyo Mudanayaasha sharafta leh way salaaman yihiin, Xeerkan Baananka Islaamiga in badan buu ina horyaalay oo weynu ka doodney mudo dheerbuu inagu qaatey inaynu wax ka badalno, waxaan mudanayaasha xasuusinayaa inaanu dastuur ahayn ee uu Xeeruun yahay wax ka badalna lagu sameyno karo, inkastoo aanan wax turxaana aanan ku arag intaan akhriyay.

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** wax badan buu Xeerkani inaga hortaagan yahay markaa waxaan soo jeedinayaa in sid dhakhso ah loo ansixiyo ama marka laga doodo wiiganba la ansixinyo.

**9. Md. Xaashi Xuseen Caabi:-** Shirgudoonka iyo Mudanayaashu way salaaman yihiin, horta xeerkanu waa xeer in badan ina horyaaley, dadbadana way ka shaqeyaan, waxaana qabaa dadkan ka shaqeynayaa waa dadka daneynaya, baananka islaamiga waa wax hore u jirey oo caalamiya inagana waa wax inagu cusub, hadii ay inagu cusubtahayna in laga shakiyaa waa waajib, marwalba Xeerka waxaan ka eegaynaa umada dan ma u yahay Xeer baan dhexe ama baanan islaamiya ha ahaadee, waxaynu nahay bulsho dhaqaale ahaan iminka qarka soo jafeysa mar hadaynu qarka soo jafeyno inaynu dadkeena ilaalino ayaa waajib inagu ah, anigu waxaan leeyahay halkan la leeyahay Baananka Islaamiga ah waa in lagu daraa ee Wadinga ah.

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** Xeerkani aad ha looga fiirsado hana la hakiyo, oo waliba Xeerkii Baananka Ganacsiga ah ha laga soo horeysoo oo Xeerkan Baananka Islaamiga dib ha loo dhigo.

10. **Md. Maxamud Jaamac Cilmi (Dable):-** Horta Shirgudoonka iyo Mudanayaasha waan salaamayaa, waxaa dawlihidii waaweynaa ee yurub ay u kaceen dhaqaale, dhaqaalahana Bunuunktaa ku ciyaarta, biniaadamkuna wuxuuna khibrad u lahayn inuu shanta lagalo maaha, war ha loo daayo waxwalba cidii takhasuskeeda lahayd, waa in la keenaa Profile, damaanda, Hantida iyo Meeshuu ka soo jeedo marka baan la furnayo sida aduunka baananka loo furo, tan kale Golaha wasiirada sow Wasiirka Maaliyada Coverka saari mayo oo damaanad qaado, Xeer hoosaadkeena waxaa ku qoran in wixii Golaha technical uu baahdo uu ula tago cid expert ah oo ka caawisa dadkii dhaqaalaha yaqaaney dalkeena way ka buuxaan, iminka baan islaamiyaa furan wax warqad oo sida u shaqeeyo kama hayno, mana ogi,

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** Waa inaynu helnaa profileka Bangiga, tan kale cidii cilmiga u lahayd waa in doodaayaa, Wasaarada Maaliyaduna tashriicii Council of Ministeriska waa inuu soo maraa, Wixii aan hore aan halkaa bangiga kaga hadalney waa inaan helnaa.

***Gudoomiyaha:-*** Mudanayaashii dooda isu-diiwaangaliyay intaasay ahaayeen, weyna mahadsanyihiin Mudanayaasha dooda ka qeybqaatey, Xeerkan maaha mid shirkad gaara loo sameynayo, waa Xeer Qaran, barito waxaynu u codeyn doonaa Wax ka badalkii iyo kaabistii Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr, 20, oo Guurtda ka soo noqdey maantana la idiin qeybiyay markaa Mudanayashu ha ka soo wada qeybgalaan Fadhiga bari, Xeerkan laga doodeyna waxaa la soo ururin doonaa doodiina oo Minuteska ayay Hadal Qoraalku soo qori doonaan.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha Waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada JSL** | **Xoghayaha Guud ee G/ Wakiilada JSL** |